WASAARADDA WAXBARASHADA HIDDAHA
IYO TACLIINTA SARE

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD. 2019

# AF-SOOMAALI

2019

XAFIISKA IMTIXAANKA IYO SHAHAADADA

SomExams

SOM EXAMS

JUMHURIYADDA FEDARAALKA SOOMAALIYA

وزارة التعليم والثقافة والتعليم العالي لجمهورية الصومال الفدرالية

WASAARADDA WAXBARASHADA, HIDDAHA IYO TACLIINTA SARE

IMTIXAANKA SHAHAADIGA AH EE DUGSIGA SARE

FASALKA 4aad, MAAJO 2019

# IMTIXAANKA AF-SOOMAALIGA

WAKHTIGA: 2 SAACADOOD

## Jawaabaha Su'aalaha imtixaanka ku qor buugga jawaabaha

SAMAAN PRINT

Akhri sheekadan ka dibna ka jawaab weydiimaha ka dambeeya.

Gacal qoyskoodu waxa ay deggenaayeen magaalada Xamar, waxa ay ka koobnaayeen 5 caruur ah aabahood iyo hooyadood. Aabaha waxa uu dukaan ku lahaa degmada Xamar-Weyne. Iyaga oo meeshii deggen ayaa waxaa qarxay dagaalkii sokeeye ee sannadkii 1991-kii. Gacal qoyskoodii waxa ay maqleen rasaas dhacaysa, waxayna arkeen deriskii oo qaxaya. Qoysaskii waxa ay ku tashadeen inay u barakacaan miyiga Xamar ee ka sokeeya degmada Balcad. waxa ay qaateen labo boorso oo dhar ku jiro, raashin, joodariyo, maacuun iyo salliyo ay ku tukadaan. Markii ay wax badan socdeen ayey qaadi kari waayeen alaabtii. Guri u dhawaa meeshii ay marayeen ayey albaabkiisii garaaceen, islaan waayeel ah oo kaligeed guriga joogtay ayey u dhiibteen labadii boorso ee dharku ku jiray.

Habeenkii waxa ay ku hoydeen geed hoostii, subaxii dambe ayey meeshii ka tageen. In badan markii ay socdeen ayaa caruurtii oohin iyo buuq isku dareen. Aabihii waxa uu qaatay labo caagadood si uu biyo u raadiyo, hooyana waxa ay doontay xaabo wax lagu karsado.

Markii uu aabbihii biyihii keenay hooyana in xaabo ah ay soo gurtay ayuu aabbe ku yiri hooyo: *"Meeshani waa cidlo' biyo iyo deris midna malaha, markaa caruurta u kaxee*



• www.somexams.com ✳ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

*meel deegaan fiican leh, aniguna dukaankii ayaan ku noqonayaa si aan waxa loo baahan yahay uga soo qaado".*

Hooyadii ayaa tiri "anigu dhulkan ma aqaan, caruurtana qaar ayaa buka ee hanaga tegin". Cabbaar markii ay doodeen ayey isku waafaqeen in Gacal aabihii tago, reerkiina habeenkii waxa ay seexdeen geedkii hoostiisa.

Subaxdii ayaa hooyo aragtay caruurtii oo qaarkood qufacayaan, qaarna shubmayaan. Hooyo waxa ay Gacal ku tiri "Hooyo, waxaan raadinayaa meel biyo leh ee caruurta iyo alaabta la sii joog".

Caruurtii waxa u yimid oday dadka baadiyaha deggen ka mid ahaa, waxaanu warsaday caruurtii meesha ay ka yimaadeen, cidda la joogta iyo waxa ay u baahan yihiin, waxaanu u keenay raashin iyo biyo. Hooyadoodna markii ay soo noqotay waxa ay u timid caruurtii oo ay wajigooda farxadi ka muuqato, waxaanay u mahad celisay ninkii reer baadiyaha ahaa.

SAMPLE PRINT

Qaybta 1-aad: (20-dhibcood): Goobo geli jawaabta saxda ah:

1. Gacal qoyskoodu waxa ay degenaayeen gobolka:

| | | | |
|---|---|---|---|
| b. Jubbada hoose | t. Balcad | j. Xamar weyne | x. Banaadir |

2. Gacal hooyadii waxa ay aabihii ku tiri:

| | | | |
|---|---|---|---|
| b. Anigu dhulka ma'aqaani | t. Caruurta qaar ayaa jooga | j. Waan ku raacaynaa | x. B iyo T |

3. Gacal hooyadii waxa ay ku tiri:

| | | | |
|---|---|---|---|
| b. Waxaan raadinayaa magaalo | t. Waxaan raadinayaa Waddo | j. Waxaan raadinayaa meel biyo leh | x. Intaba |

4. Caruurtii waxa u yimid:

| | | | |
|---|---|---|---|
| b. Nin reer magaal ah | t. Nin wanaagsan | j. Nin wadaad ah | x. Adeerkood |

5. Ninkii caruurta u yimid waxa uu u keenay:

| | | | |
|---|---|---|---|
| b. Raashin iyo biyo | t. Raashin iyo dawo | j. Raashin | x. Biyo keliya |

6. Gurigaaga oo aad ka barokacdo waxa ay keeni kartaa:

| | | | |
|---|---|---|---|
| b. Nolol xun | t. Caafimaad darro | j. Wanaag | x. B iyo T |



• www.somexams.com ✳ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

SOM EXAMS

7. Markii ay wax badan socdeen:

| | | | |
|---|---|---|---|
| b. Ayey alaabtii qaadi kari waayeen. | t. Ayey daaleen | j. Ayey fadhiisteen. | x. B iyo t |

8. Aabbe waxa uu raadiyey:

| | | | |
|---|---|---|---|
| b..Caano | t. Biyo | j. Shaah | x. Dhammaan |

9. Markii aabaha iyo hooyada ay cabbaar doodeen ayey ku heshiiyeen:

| | | | |
|---|---|---|---|
| b. Iney hooyo tagto | t. Inuu Aabbe tago | j. Iney wada joogaan | x. Iney wada tagaan |

10. Sheekadani waxa ay ku saabsan tahay:

| | | | |
|---|---|---|---|
| b. Dhibaatada barakaca | t. Dhibaatada qabyaaladda | j. Dhibaatada dawlad la'aanta | x. Dhammaan |

Qaybta 2-aad: (26-dhibcood): Maanso iyo Maahmaahyo

SAMAAN PRINT

11. Sharrax kooban ka bixi tuducyada hoos ku qoran ( 6-dhibcood)

| |
|---|
| Ninkii dawlad qiyaanay *** waa dambiile ismooge |
| Door hadduu wax ka qaato *** oo door kaleeto ka qaato |
| Kuma deeqdo intaane *** ka doonuu is yiraahdaa |
| Isagoo daldalaayoow *** dabinkii ku dhacaa |

12. Sharrax kooban ka bixi maahmaahyadan soo socoda ( 8 dhibcood)

| |
|---|
| i) Adigoo harsan waayey malaguu soo hargalay |
| ii) Dani waa seeto |
| iii) Arin xumo abaar ka daran |
| iv) Gacmo wada jir bay wax ku gooyaan: |

13. Qeex ereyadan soo socda: ( 12-dhibcood)

| | | | |
|---|---|---|---|
| Tiraab, | maahmaah, | murti, | tix |



• www.somexams.com * info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

SOM EXAMS

Qaybta 3-aad: Naxwe iyo ereyo (24-dhibcood): Naxwe (8-dhibcood)

14. Qeex ereyadan hoos ku qoran

| | | | |
|---|---|---|---|
| Naxwe, | Fal, | Magac-u-yaal, | Falkaab |

15. u kala saar ereyadan soo socda ( magac, magac-u-yaal, fal, falkaab iyo meeleeye) (10-dhibcood)

Qabo, Galbeed, Dawlad, Si fiican, aasan, Jowhar, annaga, arday, tagey, agteeda

16. isku aaddi ereyada isku macnaha ah (6-dhibcood)

| Erey | Macne |
|---|---|
| Hanfi | Doog |
| Naq | Tigaad |
| Qadaad | Dhulka, biyaha, hawada |
| Baad | Barwaaqo |
| Aaran | Kuleyl dabeyli weheliso |
| Deegaan | Jeego |

SAMAAN PRINT

Qaybta 4-aad: Weedho iyo ereyo ( 10-dhibcood)

17. U beddel ereyadan keli kelida ah wadar ( 5-dhibcood)

Rati, inan, gabar, qalin, nin, ri', dugsi, arday, geel, dhagax

18. Ku hor qor ereyadan soo socda lidkooda (5-dhibcood)

Xaqsoor, macaluul, utun, abaar, gun,

Qaybta 5-aad: Curis ( 20-dhibcood)

19. Ka qor mawduucyada hoos ku qoran mid ka mid ah ugu yaraan 200 oo erey.

a. Dhibaatada qabyaaladda
b. Dhibaatada dawlad la'aanta
c. Dhibaatada tahriibka

DHAMMAAD



• www.somexams.com ✳ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com